

# Taageero loogu talo galay qofka waalidka ah

## Adeeg talo bixin ah oo xafiiska adeega bulshadu bixiyo

Qofka waalidka ahi waxa uu la kulma waxyalo badan oo farxad galiya laakiin qofkasta wuxu la kulmi karaa dhibaatooyin iyo marxalado uu u baahan karo talo iyo tageero, marka ay noqoto su,aalaha ku saabsan xaga waalidnimo. Waxaanu waalidiinta usoo bandhignaa oo siinaa adeegayo talo bixin oo kala duwan. Waxayna kala yihiin warbixino, talo bixin iyo ka hortag. Waxa la siinaya dhamaan dadka raba oo dhan, lagama duwaan galinayo xafiiska adeega bulshadda, waana lacag la,aan (marka laga reebo goobaha talo bixinta qoysaska halka oo laga qaado khidmad yar). Waxaanu dadka usoo bandhignaa adeegyo kala duwan:

**Rugta caafimaadka qoyska/Familjecentralen (0-6 sanadood)**
Skövde waxa ku yaala laba goobood oo rugta caafimaadka qoyska qaabilsan mid wuxu ku yaala Södra Ryd iyo mid ku yaala Centrum. Waa gooboo ay ku kulmaan qoysaska haysta caruur da'doodu u dhaxayso 0 -6 sanadood. Halkaa waxaad ku waydiin kartaa su'aalo iyo in lagu siiyo talo iyo taageero kalo duwan. Waxa jira goob iska furan oo cid kastaa iska iman karto iyo kooxo waalida oo laga caawiyo baahiyo kala duwan oo ay qabaan.

**Rugta caafimaadka qoyska/Familjecentralen Kärnan (centrum), 0500-49 86 53.**
**Rugta caafimaadka qoyska/Familjecentralen Symfoni (Södra Ryd), 0500-49 82 00**

**Taageero siin qoyska/Familjestöd (0-20 sanadood)**
Ma rabtaa in lagu siiyo taageero si aad u noqoto waalid kasii wanaagsan si aad u wanaajiso xidhiidhka iyo wada shaqaynta idinka dhexeeya ilmahaaga/cunugaaga oo aad u yarayso dagaalka/buuqa walaalaha dhexdooda ee aad u maarayn lahayd xanaaqa ilmahaaga iyo ee aad u wanaajin lahayd inaad maarayso xanaaqa/cadhada xagaaga iyo dulqaad la,aanta? Markaa waxaad la xidhiidhi kartaa Lundvivegården eller Familjeteamet. Waxay ku siinayaan talo iyo taageero ku socota walidiinta iyo qoysaska.
**Lundvivegården, , waxay talo iyo taageero siiyaan qoysaska haysta caruur da'doodu u dhaxayso 0 – 12 sanadood, 0500-49 87 18**
**Familjeteamet, waxay talo iyo taageero siiyaan qoysaska haysta caruur da'doodu u dhaxayso 13-20 sanadood, 0500-49 38 82**

**Talo iyo taageero ku saabsan aalkolada/khamriga, daroogada iyo dambiilanimada (13-20 jir)**
Dhalinyartadu ma leeyihiin dabeecado khatara marka ay noqoto aalkolad/khamriga, daroogada iyo dambiyada? Markaa waxaad la xidhiidhi kartaa Locus. Waxay kugu casuumayaan oo kale talo bixin, warbixin iyo wada hadal qoyska la la yeesho.
**Locus, waxaad kala xidhiidhi kartaa goobta degmada lagala xidhiidho/Kontaktcenter, 0500-49 80 00**

Mer information på nästa sida >

SKÖVDE

**Kulanka xidhiidhka/Nätverksmöten (0-20 sanadood)**
Kulanka xidhiidhka waxa uu yahay in dadka mihiimka ah ee ka socda goobaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa xirfad layda ah ay iskugu yimaadaan si ay wada jir ugu taageeran ilmahaaga ama dhalintaada kolba sidii ugu ficaan. Ujeedadu waa in la is dhagaysto oo la is waydaarsado fikirka iyo ra'yiga iyo in la is caawiyo si dhibaatada iyo caqabadaha loogu helo xal waara. Waxaanu idiin soo bandhigayna laba dariiq oo kala duwan.
**Resursmöte/SIP, 0500-49 88 65, 0500-49 88 66**
**Sociala insatsgrupper (SIG), 0500-49 85 43, 0500-49 81 96**

Warbixin dheeraada oo ku saabsan adeega talo bixineed waxaad ka heli karta **www.skovde.se/serviceinsatser**

**Goobta sharciga qoyska/Familjerätt (0-18 år)**
Miyaad kala tagteen oo ay idinku adag tahay inaad ka heshiisaan su'aalaha masuuliyada caruurta, meesha ay dagayaan iyo la kulanka caruuta? Waxaanu idnku caawin karnaa wadahadalka wada shaqaynta(samarbetssamtal) xafiiska sharciga qoyska. Halkaasi ayaa la idinkaga caawinaya sidii aad u xidhiidhi lahaydeen iyo sidii aad u wada shaqayn lahaydeen – wixii ilmaha u fiicaan darteed.
**Familjerätten, 0500-49 84 08**

**La talinta qoyska/Familjerådgivning**
Hadii aad waalid ahaan u aragtaan in aad dhibaato idinka haysato xaga xidhiidhka waxa jira caawimo aad ka heli karto goobta lagula taliyo qoyska. Marka ay cimilo wanaagsani guriga ka jirto waxay kobcisa caafimaadka iyo horumarka caruurta.
**La talinta qoyska/Familjerådgivningen, 0500-49 87 04**

**Barnaamijka taageerada waalidka(koorsooyin)/Föräldrastödsprogram (kurser):**
Ma rabtaa inaad ka qayb qaadato koorso, adiga iyo waalidiin kale?
Waxaanu kusoo bandhigayna/kugu casuumayna tiro dhawr koorso oo kamida barnaamijka taageerada walidiinta:

- **ABC - Alla barn i centrum (3-12 år),**
- **ICDP - Vägledande samspel (0-6 år),**
- **COS-P - Trygghetscirkelns föräldraskap (0-12 år),**
- **Komet - KOmmunikationsMETod (12- 18 år),**
- **BIFF - Barn i föräldrars fokus (för föräldrar som separerat)**

Waxa kale ee aan idinku casuumi karnaa taageero xaga caruurta ah iyo da'yarta sida **Kojan** (kooxda taageerta ama caawisa dhalinyarta ku soo kora qoysas ay ka dhacdo si xun u isticmaalid maandooriye ama caafimaad daro xaga maskaxda ah) iyo **rePULSE** (dhalinyarta u baahan inay bartaan sidii ay u maarayn lahaayeen ee ay u koontorooli lahaayeen fikrad deg deg ah oo kusoo dhacda kuna laguna dhaqaaqaayo).

**Warbixin dheeraad ah:** Waxaad ka helaysaa wixii warbixin dheeraada ee kale oo ku saabsan adeegyada aanu bixino boga ay internatka ku leedahay degmada Skövda. Halkaa waxad ka helaysaa oo kale adeegyada kale ee aanu bixino ee ku socda dhalinta, dadka waaweyn iyo qoysaska.

Faah faahin dheeraada ka akhriso **www.skovde.se/serviceinsatser**